



Su'aalaha Badanaa Lays Weydiiyo -Dugsiyada Dadweynaha Minneapolis Amaanka Biyaha!

Sidee buu ku galay Daxalka Leadka biyaha Dugsiyadeena?

Sida laga xigtay Waaxda Caafimaadka Minnesota, in Daxasha Leadka ku jira biyaha la cabo, ayaa ugu horynta lala xiriiriyaa qalabka iyo Tubooyinka xiriiriyaa biyaha la cabo. Daxalka "Lead" ayaa abuuri karo dhibaatooyin dib u dhaca ah, waxaa laga yaabaa in uu isugu soo ururo daxasha "leadka" meelaha Tubooyinka laga cabo. Inta badan Daxasha "Leadka" uu ku badan yahay tubooyinka biyaha wadaajiyaa sida, kana dhasha meelaha la alxamay ee tubada, iyo meelaha naxaasta, kolka uu halkaa isku urursado ayuu u gubi karaa tubooyinka laga cabo biyaha.

Isha ugu badan ee daxalka Lead-ka ayaa ah biyaha tubooyinka dhexmara, sida meelaha tubooyinka meelaha laga alxamo oo ka aaryeyesta, ama curiyahooda macdanta hooseeya iyo sifooyin kale. Tayada biyaha ayaa haysan kara ilaa iyo xad, intaa waxaa dheer mudo intee la'eg ilaha biyaha ayey Lead-ku saameyn ku yeelan karaa biyaha la cabo. Inta ay biyahu ku sugan yihiin nidaamka tubooyinka, ayey halis u yihiin inuu ku abuurmo leadka. Waxaa kale intaa dheer in lagu daro daawooyinka biyaha, iyo heer-kulbeega biyaha, mudadada ay ku raagaan Tubooyinka, Dhamaan waxay sababi karaan in daxasha leadka looga dhowro biyaha.

Halkee Bay biyaha ka helaan Dugsiyada Dadweynaha Minneapolis MPS?

Biyaha waxaan ka helnaa ilaha biyaha magaalada Minneapolis. Oo uu ku yar yahay daxalka iyo leadka, Degmada mineapolis waxay ku dadaashaa inay xakameeyso Biyaha si looga dhowro, daxalka. Intaa waxaa dheer in degmadu ay ku darto Cusbo nooca loo yaqaano "polyphosphate" oo sifeynaysa. Taas oo jawaabteedu tahay, Ilaaha biyaha ee Minneapolis, Waxaa ay ku cabiran yihiin qasabadaha yar yar oo biro ah iyo tubooyinka lagu xiriiriyey ilaha biyaha laga cabo.

Maxay tahay ula jeedada waxaa ku badan daxalka "high lead"?

Sida ay u aqoonsadeen [Hay'ada Ilaalada Deegaanka](#) iyo [Waaxda Caafimaadka Minnesota](#) (MDH) inuu yahay heerka ugu sareeya ee daxalka Biyaha inuusan ka badan Heerka 15ka halkii billion (ppb). Tijaabooyin lagu sameeyey darteed, MDH ayaa waajib uga dhigaya dugsiyadeena in wax laga qabto hadii uu ka bato daxalka leadka heerka 20 ppb.

Dugsiyada Dadweynaha Minneapolis MPS ayaa leh dhismayaalka in ka badan 40 Dhismo, oo ay u aqoonsadeen in la dayactiro. Waana tijaabinaa biyahooda angoo raacayna waxa ay amartay waaxda caafimaadka Minnesota MDH, ay ka midka yihiin biyo daadinta hore. Taas oo macnaheedu yahay ururrinta wixii la xiriira biyaha uu daxalka ku badan yahay sida todobaadka daboyaaqadiisa iyo subaxa hore sida aanu u aragno halka uu ku badan yahay, Maxaa yeelay biyaha in badan fadhiya qasabadaha ayaa daxashu ku korortaa.

Intee in la'eg baa biyaha dugsiyada loo aqoonsaday in uu ku badan yahay daxasha "leadka"?

Heerka ugu sareeya ee la tijaabiyey ayaa ah 400 ppb iyo heerka aan wax ka qabano oo ah 20.

marka la barbar dhigo midaan iyo wixii ka dhacay Degmada Flint, MI ma la midbaa?

Maya. Heerka daxasha Leadka Flint, MI waxaa uu ahaa mid ka badan 13,000 ppb.

Sidee baa u ilaalin kartaan biyaha nabadgalyadooda?



MINNEAPOLIS
PUBLIC SCHOOLS

Urban Education. Global Citizens.

Waxaanu raacnaa [Talootinka MDH](#). Taas oo sahasha inaan iska tijaabino biyaha, sida biyaha hore oo la daadiyo halka aanu u ragno in ay u baahan yihiin sameyn iyo hagaajinta tubooyinka lagu dadaalo hagaajintooda.

Tusaale ahaan, Markii ay nala soo gudboonaato dayactirka, waxaanu isku daynaa in biyaha la isticmaalo inaan badalno si uu dhib uga imaanin. Tan waxaan ku suubinay dugsiga hoose ee Webster, kaas oo uu ka hooseeyo heerkiisa biyaha daxasha 20 ppb sida caadiga ah.

Maxay tahay Daadinta biyaha

Daadinta biyaha waa tixraac naga soo gaaray waaxda caafimaadka Minnesota MDH, si looga yareeyo daxasha biyaha la cabo. Hadii uu Tijaabinta biyaha dugsiga ka yar tahay 20 ppb, xitaa hadii aanu ku dhaqaaqno tijaabadan biyo daadinta waa barnaamij uu ogol yahay waaxda caafimaadka Minnesota MDH.

Subax walba, shaqaalaha dhismaha “engineers” ayaa mas’uul ka ha daarista biyaha in ay daadiyaan ilaa mudu dhan “10” toban daqiiqo si ay u hubiyaan biyahaas nadiikooda. marka ay ka soo baxaan biyo nadiif ah si maalintaas oo dhan loo isticmaalo biyahaas nadiifka ah oo ka sifaysan daxasha Leadka.

Sideen ku ogaan karnaa in la raacay borotokoolka?

Shaqaalaha “Engineers” ayey waajib ku tahay inay joogto ah subaxa hore dhismaha biyaha uga daadiyaan tubooyinka. Anaguna ilaalo guud ayaan ku eegnaa meelaha ku haboon, si aanu u hubino in la raacay Borotokoolka sida uu dhigayo.

Maxay tahay sababta aad u Fayadhowri Weydeen biyaha si joogto ah?

Dayrtii la soo dhaafay, ayaan bilownay in La fayadhowro biyaha si joogto ah. Anagoo ka ilaalinayna daxasha, macno ma sameynayso Hadaan la fayadhorin biyaha, maxaa yeelay waan ognahay dhismayaasha u baahan in laga tijaabiyo daxasha .iyo kuwa uu ku badan yahay. Mana jiran isbal aanu sameynayno hada maxaayelay waxaan raacnaa sida nala faray inaan daadino biyaha hore inta aanan dhismaha la isticmaalin.

Inta aanu bilownay tijaabooyinka joogtada ah, waxaa yaraaday dugsiyada horay u lahaan jiran daxasha leadka oo aan hada laheyn. Si kastaba ha ahaatee waan sii wadaynaa Barnaamijka biyo daadinta hore dhismayaasheena oo idil.

Halkee baan ka barankaraa wixii dheeraad ah?

Degmada Minneapolis, Waaxda Caafimaadka ee Minnesota iyo Haya’da Ilaalada Deegaanka Dhamaantood waa meel aad ka heli karto waxii macluumaad ah ee la xiriira.

- <http://www.minneapolis.gov/publicworks/water/WCMSP-173109>
- <http://www.minneapolis.gov/www/groups/public/@publicworks/documents/webcontent/wcmsp-173111.pdf>
- <http://www.health.state.mn.us/divs/eh/water/schools/>
- <http://www.health.state.mn.us/divs/eh/water/schools/pbschoolguide.pdf>
- <http://www.health.state.mn.us/divs/eh/water/factsheet/ncom/lead.pdf>
- <https://www.epa.gov/ground-water-and-drinking-water/basic-information-about-lead-drinking-water#regs>